

Aadista Dugsiga
Warbixin lasiinayo Waalidiinta

Maadaama canuggaaga laga diiwaan geliyay dugsi ku yaal degmada warbixinta soo socotaa waxay faahfaahinaysaa waajibaadkaaga u kuurgelidda inuu si joogto ah u aado dugsiga.

- Sharcigu wuxuu dhigayaa in dhammaan caruurta da'doodu u dhaxayso (5- 16 sano) ee dugsiyada dhigta ay qasab tahay inay helaan waxbarasho wakhti buuxa.
- Mas'uulka Waxbarashada Degmadu (LEA) wuxuu u kuurgeli doonaa aaditaanka dugsiga ee ardayda oo dhan, waxayna baari doonaan haddii ardaygu si joogto ah uga maqan yahay dugsiga.
- Waa waajibaadka sharci ee waalidka saaran inuu hubiyo canuggoodu inuu maalin kasta aado dugsiga wakhtiga looga baahan yahay.
- Haddii adiga ama canuggaagu la kulmo dhibaato u diidaysa inuu dugsiga u aado si joogto ah waa lagama maarmaan inaad sida ugu dhakhso badan ula xiriirtid dugsiga.
- Dugsigu wuu u riyaaqi doonaa inuu kaa caawiyo arrin kasta oo laga yaabo inay faragelin ku yeelato waxbarashada canuggaaga. Waxaa kaloo jirta in Sarkaalka qaabilsan Daryeelka Waxbarashadu uu ku farxi doono inuu taageero kuu fidiyo.

¹ Somali

Waad ku mahadsan tahay wada-shaqayntaada ku saabsan
arrintan.